## Mabaadiida Waxqabadyada Dhallaanka

1 Dhallaanka iyo ilmaha socod baradka waxay si fiican wax uga bartaan waayo aragnimada maalinlaha ah iyo isdhexgalka dadka ay yaqaanaan si ay sameeyaan hawlaha

2 Dhammaan qoysaska, marka la helo taageerooyinka muhiimka ah iyo ilkaha, waxay kor u qaadi karaan waxbarashada carruurta iyo kobacooda

3 DOorka muhiimka ah ee bixiyaha adeegga Waxqabadka Dhallaanka waa inay la shaqeeyaan oo ay taageeraan xubnaha qoyska iyo nolasha daryeel bixiyaasha

4 Nidaamka Waxqabadka Dhallaanka, laga bilaabo xiriirka koowaad ilaa u wareegida dugsiga, waa inuu noqdaa mid firfircoon oo shaqsi si uu u muujiyo dookhyada ilmaha iyo xubnaha qoyska, noocyada waxbarashada, iyo caqiidooyinka dhaqameed

5 Natiijooyinka IFSP (Qorshaha Adeega Qoyska ee Shaqsi)waa inay noqdaan kuwo shaqeynaaya oo ku habboon baahiyaha qoysaska iyo carruurta iyo mudnaanta aqoonsiga qoyska

6 Mudnaanada qoyska, baahiyaha iyo xiisaha waxaa sida ugu habboon oga hadla daryeel bixiyaha koowaad oo matala helidana kooxda iyo taageerada bulshada

7 Waxqabadyada carruurta yaryar iyo xubnaha qoyska waa inay ku saleysan yihiin mudnaano fudud, habraacyo shaqeynaaya, cilmi baarisyada ugu habboon ee la heli karo, iyo sharciyada iyo qaanuunada ugu habboon

*Macluumaad ay bixisay Waaxda Carruurta iyo Dhallinta ee Ohio*

## La xariir

Ma qabtaa walaacyo la xariira kobaca ilmaha?

Si aad u sameyso gudbin Wac **1-800-755-GROW** ama iskaan mari koodhka QR-ka

Wali  su'aalo ma qabtaa?

Si aad u hesho ASQ oonleen-ka ah booqo **helpmegrow.org/ASQ** ama iskaan mari koodhka QR-ka

Gobalka Ohio, Barnaamijka Waxqabadka Dhallaanka waxa uu fuliyaa Sharciga Waxbarashada Shaqsiyaadka Naafada ah ee federaalka (Individuals with Disabilities Education Act, IDEA), Qaybta C (Barnaamijka Waxqabadka Dhallanka ee Dhallaanka iyo Ilmaha Socod Baradka ah ee Naafada ah).

Qoraalka buuxa ee sharciga oonleenka ah ee laga helo idea.ed.gov/download/statute.html

Ohio Department of Children & Youth

Mike DeWine, Guddoomiyaha
Gobalka Ohio

Kara B. Wente, Agaasimaja
Waaxda Carruurta iyo Dhallaanka
DCY 00400 (Waxaa dib loo eegay 10/2024)

Hay'addani waa bixiye fursad iyo shaqo loo siman yahay.



# Waxqabadka dhallaanka ee Ohio

Ohio Department of Children & Youth

Help Me Grow Early Intervention

## Ma u baahan tahay waxqabka Dhallaanka?

Waxqabadka dhallaanka waa nidaam gobalka oo dhan kajira oo bixiya adeegyo isku xiran oo ay helaan waalidiinta carruurta yaryar ee naafada ah haysta.

## Waxqabadka Dhallaanka (Early Intervention, EI) waa nidaam Isku Dubaridan

Adeegyada EI waxay taageeraan waalidiinta ilmaha yaryar iyo kuwa socod baradka ah ee naafada ah haysta. EI waxaa lagu jaan gooyaa fikirka ah in carruurta yaryar ay sida ugu fiican wax uga bartaan dadka ay yaqaanaan ee jooga deegaanka ay garanayaan. Taasi waa sababta kooxda EI ee deegaankaaga, oo ay ku jiraan iskuduwaha adeegga iyo daryeel bixiyaasha adeegga, ay kuugula shaqeynayaan gurigaaga ama meelaha kale adiga iyo qoyskaaga waqti aad ku qaadataan si aad u samaysataan qorshe isku dubaridan.

## EI Waxaa lagu Dhisay Nidaam Horumar Ku saleysan


EI waxay dhistaa oo ay bixisaa taageerooyin iyo ilo si ay u caawiyaan waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha si kor loogu qaado waxbarashada iyo horumarka carruurta iyadoo loo marayo hawl maalin kasta. Waa nidaam wada shaqeyn, guri iyo nidaam ku saleysan bulshada gaar ahaan meesha adiga iyo kooxdu aad ka wada shaqeysaan si aad u siisaan taageero joogto ah cunugaaga.

## Doorka Qoyska

Aqoonso doorka muhiimka ah adiga iyo daryeel bixiyaasha kale ku leeyihiin kobaca ilmahaaga

- La wadaag waxyaabaha aad xiiseyneyso, mudnaantaada, baahiyahaaga iyo su'aalaha daryeel bixiyahaaga koowaad
- Deji yoolal ku saleysan sida horumarka cunugaaga ula jaanqaadayaan waxyaabaha muhiimka u ah qoyskaaga
- Wax ka baro kooxda si aad ula shaqeyso cunugaaga inta lagu jiro jadwalada maalin kasta ee qoyskaaga inta u dhaxeysa booqashooyinka ka bilaabanaaya daryeel bixiyaha waxqabadka





## Doorka Kooxda Waxqabadka

U isticmaalka danaha ilmaha iyo kuwa qoyska sida aasaaska waxqabadka .

- La kaasho waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha kale si aad u taageerto carruurtaada inta ay kobcayaan oo ay korniinka sameynayaan
- Diirada saar kor u qaadista ka qaybgalka cunugaaga hawlaha waayo aragnimada hadda jira, kuwa qoyska, kuwa bulshada, iyo hawlaha dhallaanka
- Si wada jir ah uga wada shaqeeya sidii xubin kasta oo kooxda ka mid ah khibraddiisa loogu isticmaali lahaa ka caawinta waalidiinta inay gaaraan yoolalka uga degsan horumarka ilmahooda
- Ka caawi qoysaska inay helaan jawaabaha su'aalahooda adag